WFP
World Food Programme | Programme Alimentaire Mondial | Programa Mundial de Alimentos | برنامج الأغذية العالمي
wfp.org

CODSIGA SOO GUDBINTA CODSIYADA (EOI): EE SOO SAARIDDA JAWAANADA-25KG & 50KG QAADKA, EE LOOGU TALO GALAY IN LAGU SHUBTO RAASHINKA (PUNTLAND)

Taariikhda Codsiga Soo Gudbinta Codsiyada (EOI):	**07da Maarso, 2018.**
Taariikhda ay ku eg tahay Qabashada Codsiyada (EOI):	**28ka Maarso, 2018.**
Nambarka Tixraaca:	**EOI/SOM-008/2018**
Cinwaanka Codsiyada (EOI) lagu soo Hagaajinaayo: **Alaabta ee WFP**	**Sargaalka Soo Gaditaanka**
Email:	**somalia.procurement@wfp.org**

I. WAXYAABAHA LOO BAAHAN YAHAY

UN WFP Soomaaliya, waxay Xafiisyo ka shaqeeya dhanka Xiriirada ku leedahay Nairobi waxayna haatan ka shaqeysaa Somaliland, Puntland, Bartamaha Soomaaliya, Banadir iyo Gobolada Koofureed ee Soomaaliya ayadoo xafiiska qaabilsan dalka Soomaaliya ku leh Muqdisho sidoo kalena Xafiisyada Goobta ku leh Hargeysa, Boosaaso, Gaalkacyo, Muqdisho iyo Dolow.

UNWFP waxay raadinaysaa shirkado u qalma oo leh khibrad shaqo oo la isku hallayn karo iyo awood ah dhanka soo saaridda/samaynta Jawaano: ah 25kg qaad iyo 50kg qaad, oo si badbaado leh loogu shubto raashinka. **Shirkadaha soo saara/ama sameeya** Jawaanada ee sifaha wanaagsan leh ee kuyaala **Puntland** waxaa lagu boorinayaa inay buuxiyaan foomka diiwaan galinta ee halkaan ku lifaaqan, kaasoo sidoo kalena lagu soo codsan karo e-mail loo soo dirayo Somalia.Procurement@wfp.org ama laga heli karo xafiiska WFP ee Dolow ama kan dhanka xiriirka ee kuyaala UN Crescent, ee wadada UN Avenue , Gigiri Nairobi.

Qandaraasleyaasha u qalma ee waafaqa sharuudaha codsigaan soo gudbinta codsiyada (EOI), waxaa loogu baaqayaa inay soo gudbiyaan codsiyada. Codsiga waxaa soo gudbisan kara **qandaraasle kasta oo awooda inuu jawaanada ku sameeyo/kusoo saaro dalka gudihiisa (maahan inuu dibada kasoo dhoofiyo)** alaabada sare lagu xusay.

Is cusleyn maleh: Codsigaan Soo Gudbinta Codsiyada (EOI) ma kujiro wax dammaanad qaad ah noocii uu yahayba kaasoo ku saabsan in durba qofkii soo codsadaba qandaraaska horay laga siinayo. Wixii codsi ah ee lasoo gudbiyo waxaa un loo aqoonsanayaa inuu yahay Codsi ee looma aqoonsanayo aqbalaad ah in WFP ay qofka codsiga soo gudbiyay ay ka aqbashay wax un. Wax xiriir ah oo ku saabsan qandaraas ma jiraayo waxaan ka ahayn kan ku cad HESHIIS ay saxiixday WFP iyo Codsadeha (Codsadeyaasha) la xusho hannaanka soo gudbinta

codsiyada kadib. Codsigaan Soo Gudbinta Codsiyada (EOI) kuma qasbaayo WFP inay aqbasho wax un Codsi ah ama in ay qandaraas bixiso.

Sharuudaha Tixraaca iyo faahfaahin kale oo badan oo ku saabsan sharuudaha ayaa loo soo diri doonaa codsadeyaasha qandaraaska u qalma ee codsiyada soo gudbiya.

II. XOG GAAR AH

Sharuudaha u qalmidda ayaa ah kuwa soo socda:

Dhammaan shirkadaha waxaa laga doonayaa inay buuxiyaan **foomka diiwaangalinta** ayna lasoo gudbiyaan dukumiintiyada soo socda

1. **Dukumiintiyo muujinaya in shirkadaadu ay jirtay ugu yaraan 3 sano iyo ka badan,**
2. **Awood lacageed –xisaabxirka saddex sano**
3. **Awood sharci –cadeynta diiwaanka/diiwaan galin**
4. **Shaqo hore – 3 nuqul oo ah dalabyo alaab lagu soo waariday dhawaan (Purchase orders) qandaraasyo laga helay macaamiishaada oo loogu talo galay soo saaridda iyo qeybinta alaabo la mid ah tan qoraalkan lagu xusay**
5. **Sharraxaad ku saabsan shirkada: qaab dhismeedka iyo taariikhda shirkada; meelaha ay kaga taalo iyo khibrada ay u leedahay Puntland.**

Shirkadaha Diiwaan Gashan:

a) Shirkadaha diiwaangashan waa inay xaqiijiyaan in xogta iyo dukumiintiyada ay keenaan (sida caddeynmo lacageed, cinwaan, qofka lagala soo xiriiri karo, iwm) ee la xiriira diiwaan gashanaantooda ay yihiin kuwo la cusbooneysiiyay.

b) Shirkadaadu (qeybta weyn iyo/ama faracyada, hadii ay macquul tahay) waa inaysan ahayn mid xarunta QM ay diiwaanka ka saartay oo aan hada diiwaanka ugu jirin, aysan ka dhigin mid aan shaqeyneyn ama lasoo afjaray, waa inaysan diiwaanka ka saarin hawlgalada goobta iyo hayadaha kale ee QM (sida Baanka Aduunka)aysana ka dhigin mid aan shaqeyneyn ama hawlaheeda lasoo af jaray aysana ahayn mid dawlada ama Xubin ka tirsan QM ay baaritaan ku heyso.

c) Shirkadaadu (qeybta weyn iyo/ama faracyada, hadii ay macquul tahay) waa inaysan ahayn mid ku jirta liisaska 1267 iyo 1844 ama lala xiriirshay shirkad ama shakhsi liisaskaas ku jira. Liisaskaas waxaa laga heli karaa baraha internetka ee soo socda (www.un.org/sc/committees/1267/consolist.shtml) iyo www.un.org/sc/committees/751/pdf/1844_cons_list.

d) Waa inaysan ahayn hada mid falismatay, ama wajahaysa xukun ama tillaabo sharci oo wax u dhimi kara hawlgalkeeda *arintaasoo ah walaac taagan.*

e) Faracyada, wakiilada, shirkadaha u dhexeeya iyo madaxdu waa inay isku raacaan inay la shaqeeyaan xafiiska Qaramada Midoobay ee Adeegga Kormeerka Gudaha inta uu socdo wixii hannaan baaritaan ah oo ay wadaan, ka hor, inta ay socoto iyo kadib fulinta qandaraas, sida keenitaanka dhammaan dukumiintiyada loo baahan yahay, qoraalada shirkada, in la wareysto shaqaalaha iyo madaxda, iyo xog kusaabsan qarashka.

f) Nuqulka xogta ku saabsan shirkada wax soo codsatay (*Profile)* iyo qaab dhismeedka shirkada taasoo muujinaysa khibrad hore oo ay shaqadaan u leedahay.

Shirkadaha aan wali ka diiwaan gashanayn WFP:

Waxaa wali lagugu soo dhaweynayaa inaad soo gudbiso codsi adoo tixgalinaaya dhammaan sharuudaha kor lagu soo xusay, laakiin waa inaad xasuusnaato in si ay ugu qalanto inay shirkadaadu gasho diiwaanka QM ay tahay shirkadaadu inay keento waxyaabaha soo socda ka hor inta aan lagu siin qandaraaska hadii codsigaagu wanaagsanaado:

a. Liis guud oo ah adeegyada shirkadaadu bixiso.
b. Liis ay ku qoran yihiin magacyada iyo cinwaanada wakiilada iyo qandaarsleyaal hoosaadka laga yaabo in loo isticmaalo shaqada wixii qandaraas ah ee soo baxa.

c. Liis ay ku qoran yihiin magacyada shaqaalaha sare ee maareynta ee masuulka ka ahaan doona fulinta wixii qandaraas ah ee soo baxa iyo khibradooda shaqo, heerka tababarka ay qabaan iyo xirfadahooda, iyo xilalka maareynta ee ay hada hayaan iyo awoodahooda dhanka maaliyada.

d. Cadeynmo buuxa oo dhanka maaliyada ah oo ku saabsan 3dii sano ee lasoo dhaafay: Xisaab xirka qoraalo ku saabsan sida warqada maaliyada shirkada (*Balance Sheet*), iyo cadeynmo ku saabsan dekhliga, iwm.

e. Foomka Diiwaangalinta Shirkada Alaabada Keeneysa ee WFP oo buuxsan kaasoo halkaan ku lifaaqan ayaa sidoo kale ay tahay in lagu soo diro email-ka sare ku xusan.

OGEYSIIS MUHIIM AH: Diiwaangalin been abuur ah ama cillad leh oo wax ka qaldan yihiin oo shirkadaada ku saabsan waxay horseedi kartaa in codsigaaga la diido ama diiwaangalin horay u jirtay in lagaa kansalo.